

Isbeddelka Diiwaangelinta & Meeleynta Sanad Dugsiyeedka 2018-2019

Cinwaan	Fasalladay Khuseyso	Sharaxaad
Diwaangelinta K2 Febraayo 12 - Maarso 23	K2	Si loola socdo shuruudaha imtixaanka luqadda ee gobolka, diwaangelinta iyo beddelka fasalka K2 ayaa hadda qayb ka ah muddada diwaangelinta mudnaanta labaad (Febraayo 12 - Maarso 23, 2018).
Diiwaangelinta Fasalka 7aad Janaayo 3 - Febraayo 2	7	Si loola socdo nidaamyada dugsiga imtixaanka iyo isdiiwaangelinta furan, isdiiwaangelinta iyo beddelka fasalka 7aad ayaa hadda qayb ka ah muddada diwaangelinta mudnaanta koowaad (Janaayo 3 - Febraayo 2, 2018).
Dalabka Warbixinta	Kulli	Baro tirada ardayda dalbatay dugsiga iyo barnaamijka aad rabtid mudada diwaangelinta ee 2017. Warbixintan waxay kaa caawin kartaa inaad hesho dareen ah sida ay had iyo jeer qoysasku u doortaan barnaamij kasta iyo iskuul kasta. Booqo www.bostonpublicschools.org/register wixii faahfaahin ah.
Qorshaha Tayada Dugsiga (SQF)	K0-8	Dugsiyadu hadda waxay ku muuqdaan liisas doorasho oo ku salaysan SQF halkii ay ka ahaan lahaayeen heerkooda imtixaanka MCAS-ka ee degmada. Nidaamkan degmada ee lagu cabirayo tayada dugsiga waxay tixgelinaysaa dugsiga oo dhan, ma aha oo kaliya natiijooyinka imtixaannada caadiga ah. Qoysasku waxay ka eegi karaan xogta tayada dugsiga iyo macluumaadka kale ee dugsiga DiscoverBPS.org .
Meeleen Maamuleed Fursad ah.	Kulli	Haddii ay dhacdo in qoysku aanu helin mid ka mid ah doorashooyinkooda dugsi, dhammaan qoysaska waxay leeyihiin ikhtiyaar ay ku doortaan haddii ay jeclaan lahaayeen in lagu qoro dugsiga ugu dhow gurigooda oo leh kursi la heli karo, ama aan lagu qorinba dugsi BPS ah.
Dugsiyada Ikhtiyaariga	K0-8	Dugsiyada ikhtiyaariga ah ee dheeraadka ah ayaa lagu dari karaa liiska xulashada marar badan oo sanadka oo dhan ah si loo hubiyo helitaanka kuraas ku filan ardayda.
Barnaamijyada Iskuxirka Cusub & Marinada (Dariiqyada)	K2, 4	Damaanad qaad kursi oo cusub baa u jira barnaamijyadan: <ul style="list-style-type: none"> • Carruurta K1 ah ee xaqa u leh Deeqda Fidinta Xannaanada Ilmaha (PEG), kuwaas oo hadda ku jira Naadiyada Wiilasha iyo Gabdhaha Dorchester, waxay leeyihiin ballanqaad kursi barnaamijka K2-ga ee Dugsiga Everett haddii lagu qoro ugu dambeyn 22ka Maarso, 2018. • Carruurta u qalma Deeqda Fidinta Xannaanada Ilmaha (PEG) ee K1 hadda ka dhigta YMCA East Boston waxay haystaan ballanqaad kursi barnaamijka K2 ee dugsiga McKay haddii lagu qoro ugu dambeyn 22ka Maarso, 2018. Dugsiga P.A.Shaw Ardayda fasalka 3aad waxay leeyihiin ballanqaad ah kursi oo fasalka 4aad ee dugsiga Mildred Ave.
Fasallada Waxbarashada Horukacsan Isku-dhexjira	4, 5, 6	<ul style="list-style-type: none"> • Qaar barnaamijyada Fasallada Waxbarashada Horukacsan baa ku qoran inay yihiin "Hybrid," halkaasoo ardayda fasalada waxbarashada guud wax la baranayaan arday imtixaan ku helay barnaamijka AWC. Fiiri lidhehda "Advanced Work Class & Excellence For All" ("Fasallada Waxbarashada Horukacsan & Horumar Dhammaan") wixii faahfaahina. Ogsoonow in fasalada AWC ee iskujirka (hybrid) ah loogu calaamadeen (muujin) doono weli foomamka doorashada sidii AWC oo kale.
Liisaska Sugida	Kulli	Si loo ilaaliyo hufnaanta liiska sugayaasha, arday kasta oo laga saaro liiska sugitaanka laakiin raba inuu dib u soo nooqdo waxaa lagu dari doonaa xagga hoose (dambe) ee liiska sugitaanka halkii laga gelin lahaa booskiisii hore.



--	--	--

Si aad u cusboonaysiiso macluumaadka xiriirkaaga, fadlan booqo Xarunta Soo-dhaweynta ee BPS.
Wixii faahfaahin dheeraad ah, fadlan booqo bartayada internetka <http://www.bostonpublicschools.org/>